

Sheegashooyinka Fudud

Sheegashooyinka fudud waxay leeyihiin xeerar gaar ah xagga gaarsiinta. Fadlan ka fiiri buug-yaraha sheegashooyinka fudud xeerarkaas.

Gaarsiinta ku aaddan Carruurta, Shirkadaha Caamka ah, Shirkadaha Shakhsiyaad Wada Leeyihiin, Magaalooyinka, iyo Degmooyinka

Waxa jira xeerar gaar ah oo loogu talagalay u gaarsiinta ku aaddan noocyadan dhinacyada ah. Xeerka 4 ee Xeerarka Maine ee Habraaca Madaniga wuxuu iftiiminayaa xeerarkaas.

Xafiisyada Sheriff-ka

DEGMADA ANDROSCOGGIN
2 Turner Street, Auburn, ME 04210
(207) 753-2500

DEGMADA AROOSTOOK
25 School Street, Suite 216, Houlton, ME 04730
(207) 532-3471

DEGMADA CUMBERLAND
36 County Way, Portland, ME 04102
(207) 774-1444

DEGMADA FRANKLIN
123 County Way, Farmington, ME 04938
(207) 778-2680

DEGMADA HANCOCK
50 State Street, Suite 10, Ellsworth, ME 04605
(207) 667-7575

DEGMADA KENNEBEC
73 Winthrop Street, Augusta, ME 04330
(207) 623-3614

DEGMADA KNOX
301 Park Street, Rockland, ME 04841-5302
(207) 594-0429

Xafiiska Sheriff-ka (Sii socda)

DEGMADA LINCOLN
42 Bath Road, P.O. Box 611, Wiscasset, ME 04578
(207) 882-7332

DEGMADA OXFORD
26 Western Avenue, P.O. Box 179, South Paris, ME 04281 | (207) 743-9554

DEGMADA PENOBSCOT
85 Hammond Street, P.O. Box 943, Bangor, ME 04402 | (207) 947-4585

DEGMADA PISCATAQUIS
52 Court Street, Dover-Foxcroft, ME 04426
(207) 564-3304

DEGMADA SAGadahoc
752 High Street, P.O. Box 246, Bath, ME 04530
(207) 443-8528

DEGMADA SOMERSET
131 E. Madison Road, Madison, ME 04950
(207) 474-9591

DEGMADA WALDO
6 Public Safety Way, Belfast, ME 04915
(207) 338-6786

DEGMADA WASHINGTON
83 Court Street, Machias, ME 04654
(207) 255-4422

DEGMADA YORK
1 Layman Way, Alfred, ME 04002
(207) 324-1113

Ogaysiinta Dhinaca Kale: Sida loo Gaarsiiyo Waraaqaha Maxkamadda



Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan gaarsiinta, booqo www.courts.maine.gov.

www.courts.maine.gov

Waa maxay "Gaarsiin?"

Markaad ka bilawdo dacwad ama kiis qoys maxkamadda, waxa waajib ah inaad ogaysiiso dhinaca kale ee arrinka aad ku haysato maxkamadda keenayso. Waxa jira dhawr hab oo sidan loo sameeyo, iyadoo ku xiran cidda ama waxa dhinaca kale yahay. Gaarsiinta waraaqaha dhinaca kale si aad u hubiso inuu kiiska ogaado ayaa la dhaha "Gaarsiin." Sidan tan loo sameeyo waxa lagu sharraxay hoos.

Kadib gaarsiinta dhinac, waxa waajib ah inaad u gudbiso maxkamadda "caddaynta gaarsiinta" (waraaqda muujinaysa dhinaca kale inuu helay waraaqaha). Maxkamaddu muddayn mayso kiiskaaga ilaa aad gudbiso caddaynta gaarsiinta.

1. Gaarsiinta in Gacanta looga Dhiibo ama Boosta loo Dhigo

Gaarsiintu waxay sida badan ku dhacdaa mid ka mid ah saddex hab:

1. Gaarsiinta in gacanta looga dhiibo ama boosta loo dhigo,
2. Gaarsiinta loo maro boostada gaarka ah oo leh gaarsiinta xaddidan ee kiisaska qoyska, sheegashooyinka fudud, iyo kiisaska madaniga qaarkood kuwaasi oo ku lug leh hanti sida hoos lagu sharraxay, ama
3. Gaarsiinta uu sameeyo Sheriff-ka.

- Gacanta uga dhiib dhinaca kale waraaqaha maxkamadda, iyadoo ay la socdaan "Qiraalka Helitaanka Yeermada iyo Cabashada" (CV-FM-036), ee ah inaad mar hore saxeexday. U sheeg dhinaca inuu saxeexo oo kugu soo celiyo foomka qiraalka.

-AMA-

- Hel laba nuqul oo ah foomka "Qiraalka iyo Risiitka" (CV-FM-036) oo saxeex labadaba. Mid adigu hayso. Boostada kula dir nuqulka kale

nuqulka waraaqaha maxkamadda, ee ku socda dhinaca kale. Qor waraaq si aad ula dirto waraaqaha aad ku waydiisanayso dhinaca kale inuu saxeexo foomka "Qiraalka" oo uu kugu soo celiyo. Waa fikir fiican inaad raaciso gal-waraaqeed cinwaankaagu ku qoran yahay oo shaabadaysan waraaqaha si aad ugu fududayso in dhinaca kale kugu soo celiyo.

Haddaad hesho foomka "Qiraalka" oo saxeexan 20 maalmood gudahood kadib taariikhda aad siisay dhinaca kale ama boostada ugu dirtay, waxa waajib ah inaad foomkaas u gudbiso maxkamadda si uu noqdo "caddaynta gaarsiinta." Nuqul adigu iska hayso. Haddii "Qiraalka" saxeexan aadan ku helin 20 maalmood gudahood, waxa waajib ah inaad ku gaarsiiso waraaqaha maxkamadda hab kale oo gaarsiin oo kiiskaaga loo oggol yahay.

2. Ku Gaarsiinta Boostada Gaarka ah oo leh Gaarsiin Xaddidan

Waxaad ku gaarsiin kartaa waraaqaha maxkamadda dhinaca kale boostada gaarka ah ee leh gaarsiinta xaddidan ee kiisaska qoyska (tusaale ahaan, kiisaska furriinka iyo xuquuqda iyo waajibadka waalidnimo), sheegashooyinka fudud, iyo kiisaska madaniga ah qaarkooda ku lugta leh hantida marka qofku gobolka dibaddiisa joogo. Haddii aadan hubin haddii ku gaarsiinta boostada gaarka ah ee gaarsiinta xaddidan loo oggol yahay kiiskaaga fadlan la hadal qareen.

Ugu dir waraaqaha maxkamadda dhinaca kale boostada gaarka ah ee leh gaarsiinta xaddidan. U qaad waraaqaha aad u baahan tahay inaad dirto xafiiska boostada oo u sheeg karraaniga boostada inaad rabto inaad ku dirto boostada gaarka ah ee leh gaarsiinta xaddidan. Hubi inaad ka codsato "risiitka soo celinta" iyo "gaarsiinta xaddidan." Tani kharash dheeraad ah ayey leedahay waxana ku saa'id ah tallaabooyin kale.

Kadib markaad waraaqaha boostada ku dirto adigoo adeegsanaya boostada gaarka ah ee leh gaarsiinta xaddidan, waxaad ka heli doontaa booskaar cagaaran xafiiska boostada kaasoo leh saxeexa dhinaca kale taasoo muujinaysa in dhinaca kale uu helay waraaqaha.

U gudbi maxkamadda kaarka cagaaran ee aad ka heshay xafiiska boostada si uu u noqdo "caddaynta gaarsiinta." Nuqul adigu iska hayso.

3. Gaarsiinta Sheriff-ku Sameeyo

Si uu sheriff-ku u sameeyo gaarsiinta waxaad ugu horrayn u baahan tahay inaad "yeermo" ka hesho karraaniga. Foomkan waxa la qaadaa lacag yar. Buuxi oo ku dar waraaqahaaga.

Boostada ku dir ama qaad 2-da nuqul ee ah waraaqaha maxkamadda ee aad u baahan tahay inaad gaarsiiso xafiiska sheriff-ka ee degmada halka dhinaca kale lagu gaarsiin doono. Waydiiso sheriff-ka inuu dhinaca kale gaarsiyo waraaqaha. Hal nuqul ayaa la siin doonaa dhinaca kale. Nuqulka kale adiga ayaa lagu soo celin doonaa isagoo sheriff-ku saxeexay. Waxaad u baahan doontaa inaad lacag siiso sheriff-ka si waraaqaha uu kuu soo gaarsiyo. Ikhtiyaarkan sida badan waa habka ugu fiican marka la eego gaarsiinta farriinta dhinaca kale.

Sheriff-ka sii cinwaanka guriga dhinaca kale. Haddaad u malaynayso inay adag tahay in dhinaca kale guriga laga helo, sheriff-ka sii cinwaanka shaqada dhinaca kale ama cinwaan kale ood u malanayso inuu sheriff-ku ka heli karo dhinaca kale.

Masuulka gaarsiya waraaqaha maxkamadda dhinaca kale ayaa buuxin doona "yeermada" taasi oo ka qayb ahayd waraaqaha maxkamadda ee aad u dhiibtay sheriff-ka waxaana lagaaga soo celin doono boosta.

U gudbi maxkamadda yeermada uu saxeexay sheriff-ka si ay u noqoto "caddaynta gaarsiinta." Nuqul adigu ka samayso.